



Oggolaanshaha Bayaanka yar

Maajo 25 2021

Sida uu qabo sharciga Oregon, carruurta yaryar ee 15 jirka iyo kuwa ka weyn waxay leeyihiin ogolaanshaha sharciga ah ee loogu ogolaanayo daaweynta caafimaadka, oo ay ku jiraan tallaalada, oo uu siiyo dhakhtarka, kaaliyaha dhakhtarka, dhakhtarka mindaawaadka, kalkaaliyaha caafimaad, dhakhtarka ilkaha ama dhakhtarka indhaha, ama xirfadlayaasha kale oo ku shaqeynaayo ruqsadda bixiyayaashaan, iyadoon oggolaansho aysan ka haysan waalidka ama mas'uulka. (ORS 109.640)

Waaqtigaan, tallaalka kaliya ee COVID-19 oo helay oggolaanshaha isticmaalka deg-degga ah ee shakhsiyadka da'doodu ka yar tahay 18 sanno waa tallaalka Pfizer. Tallaalka Pfizer waxaa loo ansixiyay in loo isticmaalo shaqsiyaadka 12 sanno iyo ka weyn. Inta badan goobaha tallaalada COVID-19 laga bixiyo waxay leeyihiin kormeera kasocdo bixiye caafimaad sida liiska kore ku qoran iyo sidaas darteed carruurta yaryar ee 15 jirka iyo kuwa ka weyn way ogolaan karaan tallaalka.

Maamulka Caafimaadka Oregon ayaa taageeraya xaquuqda carruurta yaryar ee 15 jirka ah iyo kuwa ka weyn inay ogolaadaan tallaalka COVID-19 iyaga oo aan haysanin ogolaanshaha waalidka.

OHA ayaa ka mamnuuceysa bixiyaha kor ku qoran, ama qof walba oo ku shaqeynaayo ruqsadda ama jiheynta bixiyayaashaan, ee inay ku laasimaan ogolaanshaha waalidka ee carruurta yaryar ee 15 jirka ama ka weyn, haddii carruurtaas yaryar ay ku dhaqmayaan xaquuqdooda loogu ogolaanayo tallaalka. Bixiyaha ayaa laga yaabaa, laakin loogama baahno inuu, ogeysiyo waalidka ama mas'uulka wax ku saabsan tallaalka (ORS 109.650).

Tallaalo badan oo COVID-19 waxaa laga bixiyo farmashiyaasha. Farmashiyaasha kuma jiraan liiska bixiyayaasha ee daaweyn kara carruurta yaryar ee 15 jirka iyo kuwa ka weyn iyada oo aan jirin ogolaanshaha waalidka sida waafaqsan sharciga Oregon iyo inta badan farmashiyaasha waxay kaa raboon doonaan ogolaanshaha waalidka ama mas'uulka, taas oo noqon karto hadal ama qoraal ahaan. Si kastaba, qaar ka mid ah farmashiyada waxay ku shaqeyn karaan hagida bixiyaha ku qoran hoosta ORS 109.640, iyo xaaladaan farmashiyaha waxa laga mamnuucay u bahnaanshaha ogolaashada waalidka ama mas'uulka ee carruurta yaryar ee 15 jirka ama ka weyn kaas oo ogolaanayo tallaalka COVID-19. Fiiri [Su'aalaha Badanaa La isweydiyo](#) wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan helitaanka tallaalka 12 iyo 17-sanno-jirka.

Helitaanka dukumiintiga: Shaqsiyaadka naafada ah ama shakhsiyadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriiska, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida

fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Xarunta
Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama
COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us.